Takoorku waxaa uu ka ka soo horjeeda sharciga. Adeegyada Caafimaadka Dhaqanka ee Degmada San Diego (Qorshaha) wuxuu raacayaa sharciyada xuquuqda madaniga ah ee Federaalka. Qorshuhu ma sameeyo takoor, qofna kama saaro adeegga, ama siyaabo kala duwan ulama dhaqmo dadka sababo la xiriira isir, midab, asal qaran, da'a, naafanimo, ama jinsi.

Qorshuhu wuxuu bixiyaa:

- Caawimaadyo iyo adeegyo bilaash ah oo loogu talagalay dadka naafada ah si looga caawiyo inay si fiican u wada xiriiraan, sida:
  - Turjubaanada luuqadda dhegoolayaasha oo aqoon leh
  - Macluumaad qoran oo qaabab kala duwan ah (daabacaadda farta waaweyn, maqal, qaababka elektarooniga ah oo la heli karo, qaabab kale)

- Adeegyada luqadda ee bilaashka ah ee loogu talagalay dadka aan afkooda koowaad ahayn Af-Ingiriisi, sida:
  - Turjubaano aqoon leh
  - Macluumaad ku qoran luuqado kale

Haddii aad u baahan tahay adeegyadan, la xiriir Khadka Helitaanka & Dhibaatooyinka (ACL) 24 saacadood maalintii, 7 maalmood usbuucii adiga oo wacaya 1-888-724-7240. Ama, haddii aadan si fiican wax u maqli karin ama aadan si fiican u hadli karin, fadlan wac 711.

## SIDA LOO GUDBIYO CABASHO

Haddii aad aaminsantahay in qorshuhu uu ku guul daraystay bixinta adeegyadan ama laguu takooray si kale iyadoo lagu salaynayo isir, midab, asal qaran, da'a, naafanimo, ama jinsi, waxaad Qorshaha u gudbin kartaa cabasho. Waxaad cabashada ku gudbin kartaa taleefan, qoraal, qof ahaan, ama si elektaroonig ah:

**Taleefa ahaan:** La xiriir mid ka mid ah wakaaladaha u-dooditaanka dadka ee hoose. Ama, haddii aadan si fiican wax u maqli karin ama aadan si fiican u hadli karin, fadlan wac 711.

| | |
|---|---|
| Wixii la xiriira adeegyada **BUKAAN-SOOCODKA**, wac Xarunta Macmiilka ee Barashada Caafimaadka iyo U doodista (CCHEA)<br><br>1-877-734-3258<br>9:00 a.m. ilaa 5:00 p.m. | Wixii la xiriira adeegyada **BUKAAN-JIIFKA ama DEGANAANSHAHA**, wac Barnaamijka U doodista Bukaanka JFS<br><br>619-282-1134 ama<br>1-800-479-2233<br>8:00 a.m. ilaa 5:00 p.m. |

**QORAAL AHAAN:** Buuxi foomka cabashada, ama qor warqad una dir:

| | |
|---|---|
| Wixii la xiriira adeegyada **BUKAAN-SOOCODKA**,<br><br>Xarunta Macmiilka ee barashada Caafimaadka iyo U doodista (CCHEA)<br>1764 San Diego Avenue, Suite 200<br>San Diego, CA 92110 | Wixii la xiriira adeegyada **BUKAAN-JIIFKA ama DEGANAANSHAHA**,<br><br>Barnaamijka U doodista Bukaanka JFS<br>8804 Balboa Avenue<br>San Diego, CA 92123 |

**QOF AHAAN:** Booqo xafiiska adeeg bixiyahaaga ama mid ka mid ah wakaaladaha kor ku xusan oo sheeg inaad rabto inaad gudbiso cabasho.

---

## XAFIISKA XUQUUQAHA SHACABKA

Waxaad sidoo kale cabashada xuquuqda madaniga ah u gudbin kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka, Xafiiska Xuquuqaha Shacabka adigoo isticmaalaya taleefan, qoraal ama qaab elektaroonig ah:

- Taleefa ahaan: Wac **1-800-368-1019**. Haddii aadan si fiican u hadlin ama aadan wax u maqli karin, fadlan wac **TTY/TDD 1-800-537-7697**.

- Qoraal ahaan: Buuxi foomka cabashada ama warqad u dir:

  **Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka**
  **200 Independence Avenue, SW**
  **Room 509F, HHH Building**
  **Washington, D.C. 20201**

Foomamka cabashada waxaa laga heli karaa
http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html.

**ELEKTAROONIG AHAAN:** Booqo Barta Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf.